

# Kala Qaybin

## Shaxda Ikhtiyaarka

Ilmahaaga waxa aad u sheegtaa inuu doorto hal ama wax ka badan oo hawlaho hoose ah. Waxa aad samaysaa ikhtiyaar oo waxaad daba gashaa xirfadaha muhiimka ah ee garaadka iyo hormarka dareenka bulshada.

### Su'aalaha La Waydiinayo:

- Maxaad sidan ugu kala qaybisay shayadan?
- Maxaa ay iskaga mid ka yihii waxyabahani? Sidee ayay ku kala duwan yihii?
- Ma jirtaa qaab kale oo aad u kala qaybin kartaa shayadani? Ma i tusi kartaa?

<b>Kala Qaybinta:</b> In la isku raseeyo agab kasta; waxa aad ilmahaaga ka dalbataa inuu is raaciyo dhamaan shayada isku midka ah; dhamaan malqaacadaha, farageetoo yinka, iwm.	<b>Laabid iyo Isku Rasayn:</b> Marka la labayo dharka, waxa aad ilmahaaga u sheegtaa inuu isku raseeyo dharka isku midka ah... shirabaadada is raaci, shaadhasha is raaci, saraawiisha is raaci, iwm.	<b>Uruuri oo Kala Saar:</b> Uruuri, lul ama ku raseeya banaanka. Ilmahaagu ha u kala saaro shayada isku midka wax, tusaale ahaan shayada ka baxa dhirta, shayada leh caleemaha, shayada cagaarka ah, iwm.  Marka lakala saaro waxa aad isku daydaan inaad si kale u kala saartaan.
<b>Kala Saar oo Jiid:</b> Ilmahaagu hakaa caawiyo u kala saarida raashinka sida (talaagada, weelka, ama qaboojiyaha) ay u galayaan. Waxa aad waydiisaa hadii ay arkaan wixii alaab ah ee isku mid ah?	<b>Kala saara oo Isku Habeeya:</b> Ilmahaagu ha kala saaro qalimaanta kaladhka, midabada qalin beensalada oo ha u kala saaraan midabo ama dhererka ay isku leeyihiin.	<b>Kala Saaro oo Kala Hagaajiya:</b> Marka danbe ee ilmahaagu uu kala hagaajinayo alaabta lagu ciyaaro, waxa aad ka dalbataa inuu ku bilaabo inuu dhamaan waxa lagu ciyaaro u dhigo sifo oo ay leeyihiin sida midabka ama cabirka, oo kadibna shayo nooc isku mid ah ama shaqooyin gaar ah (sida alaabta codka sameeya, la sarayn karo, ama is qalamaa gediya).

